



Ma kuu joogaan carruur iskoolka billaabaysa?

Tilmaamaha iyo talooyinka loogu talagalay waalidiinta carruurta leh marka laga gudbayo barbaarinta ilaa dugsiga.



Hordhac

Marka ugu horreysa ee iskoolka la billaabo waa dhacdo ku weyn nolosha qofka. Ma is weydiinaysaa sida ay noqon doonto billaabidda iskoolka ee ilmahaaga? Carruur iyo waalid badan ayaa dareen isku dhafan la kulma marka uu ilmuhu iskoolka billaabayo, waxaa isugu darsama welwel iyo farxad. Dhammaan carruurta waxay u baahan yihiin ammaan marka uu noloshooda isbeddel ku yimaado, waxaana markaas wanaagsan in isbeddelkaasi yahay mid qorshaysan oo laga wada hadlay. Ilmuhu marka uu diyaarka u yahay waxa soo socda, ayay u fududaanaysaa in uu ka adkaado nololmaalmeedkiisa cusub.


Talooyin adiga waalid ahaan ku saabsan bilaabista dugsiga

Saacado, maalmo iyo sanadyo badan ayuu ilmahaagu iskoolka ku qaadan doonaa, waxaana muhiim ah in ay bey'adda fasalku tahay mid u roon ilmaha oo dhan. Marka uu ilmuhu saaxiibbo leeyahay oo iskoolka jecel yahay, ayuu si fiican wax u baran karaa. Adiga waalidka ah ayaa kaalin muhiim ah ka ciyaara sidii ay ilmahaaga iyo kuwa dadka kaleba iskoolka u jeclaan lahaayeen oo saaxiibbo u yeelan lahaayeen.

- Waaliddiinta kale ee xannaanada carruurta kala hadal kalaguurka xannaanada carruurta iyo iskoolka, ma jiraan carruur ay kuwaaga isku iskool billaabayaan oo carruurta ma wada diyaarin kartaan?
- Carruur kala duwan oo qaybtaas ama fasalka dhigata guriga ku casun oo u fiirso sida ay carruurta u wada ciyaarayaan, taasi waxay ka hor tegi kartaa in ilmaha qaar la qoqobo ama la dhibo.
- Ilmaha ka caawi in uu noqdo mid inta ugu badan ee suurtaggalka ah dharka iska bixin kara oo xiran kara musqushana tegi kara.
- Wax wanaagsan ka sheeg carruurta qaybta/fasalka iyo waalidkood, waxay keenaysaa in ilmahaagu aqbaloo oo fahmo.
- Adiga iyo ilmahaagu ku tababbarta in aad iskoolka aadaan si uu kalsooni u dareemo.
- Hubi in uu ilmahaagu helo hurdo, cunto iyo dhaqdhaqaaq ku filan – markaas ayuu kordhayaa adkeysiga iskoolka ee ilmuhu.
- Iskoolka ama waaliddiinta fasalka ilmaha kala hadal in aad ilmaha nidaam u samaysaan oo ay iskoolka isu raacaan/iska soo raacaan.
- Ka fikir sida aad waalid ahaan isugu dubaridi karto xafladda maalinta dhalashada iyo isu imaatinnada bulshada ee kale, oo ay uga qayb qaataan carruurta kale ee qaybta/fasalka. Ma laga yaabaa in aad xannaanada carruurta iyo/ama iskoolka ku dhigan karto xafladahaan?
- La xiriir oo baro waaliddiinta kale ee fasalka carruurta. Waxay keenaysaa wadashaqayn wanaagsan iyo xiriir dhex mara waalidka iyo carruurta.



- Iskoolka wax wanaagsan ka sheeg, waxay saamaynaysaa fikirka iyo sida ay carruurta iskoolka u arkaan.
- U gunto maalin-dugsiyeedka ilmaha, markaas ayuu ilmahaagu iskoolka meel fiican ka gaarayaa.
- Firfircooni u samee fasalka oo dhan, waxay taasi abuuri kartaa bey'ad fasal oo wanaagsan.
- U diyaargaraw in xiriirka shaqaalaha iskoolku uu ka yaraan doono kii xannaanada carruurta.



Xannaanada carruurta iyo billowga iskoolka

Xannaanada carruurta oo la shaqaynaysa isfahanna la leh waalidka ayaa kalaguurka xannaanada carruurta iyo iskoolka iyo SFO ilmaha uga dhigaysaa mid fiican oo ammaan ah. Hubi in ay xannaanada carruurta:


- Nidaam u samaysay kalaguurka xannaanada carruurta iyo iskoolka iyo SFO.
- Leedahay waxbarasho gaar u ah carruurta iskoolka billaabaysa.
- Maammuus u sameeyaan carruurta xannaanada carruurta dhammaynaya oo iskoolka billaabaya.
- Waalidka ku casumaan in ay ka qaybqaataan qorshaynta iyo fulinta kalaguurka tusaale ahaan in loogu yeero wadahaadalo gooni gooni ah ama shir waalid loo wada qabto.
- Iskoolka siiso macluumaadka ilmaha kaddib marka taas adiga lagu sheego marka hore.
- Iskoolka siiso warbixinta waajibka xogqarintu saran tahay ee ilmahaaga iyo adinka waalidka ah. Sida uu dhigayo xeerka maammulku § 13 (waajibka xogqarinta), waxaa halkaas ku qoran in aysan shaqaalaha xannaanada carruurta iyo iskoolku sharci u haysan in ay dad kale siiyaan ama u sheegaan waxyaalaha ay ka og yihiin xaaladaha qof. Haddaba tani waa in ay dhacdaa kaddib marka ay waalidku oggolaadaan.

Iskoolka iyo billowga iskoolka

Hubi:

- In ay shaqaalaha iskoolka iyo SFO carruurta ku soo booqdaan xannaanada carruurta intaan iskoolka la furin ka hor.
- In uu iskoolku adinka waaliddiinta ah idinku casumay wadashaqayn ah sidii ay carruurtiinnu iskoolka si fiican ugu billaabi lahaayeen.
- Sida uu iskoolku uga shaqeeyo ka helidda carruurta oo dhan.
- In uu iskoolku tixgeliyo saaxiibbada carruurta marka ay iskoolka billaabayaan iyo marka fasalka laysku dhafayo.
- Sida ay tahay xaaladda kalaguurka iskoolka iyo SFO haddii uusan ilmahaagu xannaano carruur dhigan.
- Sida uu iskoolku ammaanka ugu taxaddaro bareegga, dadka oo dhanna ciyaarta uga qayb geliyo.
- Iskoolka iyo SFO ka hubi qaabka dhar bixinta/xirashada iyo tegista musqusha.
- Haddii aad degmada ku cusub sida ay tahay wadashaqayntax annaanada carruurta iyo iskoolka.
- In turjubaan laguugu qaban karo shirarka kalaguurka ee iskoolka si aad u ogaato in iskoolku warbixin sax ah ka helo ilmahaaga.
- Sida ay iskoolka iyo SFO uga wada shaqeeyaan la socoshada iyo warbixinta ilmahaaga.
- Waxa uu iskoolku adiga waalidka ah kaa filayo.
- In iskoolku dadka ka caawiyo cashirrada.
- In iskoolku wax isugu dubarido carruurta u baahan caawin dheeri ah.
- In iskoolku ilmahaaga wax u baro si ku habboon baahida iyo kartida ilmaha.

Guddiyada waalidku waxay idiin rajaynayaan nasiib wacan kalaguurka muhiimka ah ee xannaanada carruurta ilaa iyo iskoolka iyo SFO!





National parents' committee
for kindergartens



National parents' committee
for primary and secondary education

Ma kuu joogaan carruur iskoolka billaabaysa?

National Parents' Committee for kindergartens
National Parents' Committee for primary
and secondary education

© 2021

foreldreutvalgene.no

post@fubhg.no/post@fug.no

lambarka taleefanka: 477 99 200

